



Sonja T.  
Daryeel bixiye, Renton

2026-2027

# Tusaha Caymiska Daryeelka Caafimaad



Sahmi fursadahaaga iyo  
tallaabooyinkaada xiga.

Wac 1-877-606-6705 haddii aad su'aalo qabto ama  
aad u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad codsato.

Get healthcare coverage  
information in your language.

احصل على معلومات تغطية الرعاية  
الصحية بلغتك.

获取以您使用的语言提供的健康保险信息。

செலுத்தப்படும் மருத்துவ  
கவர்ப்புத் தகவல்களைப் பெறவும்.

한국어로 된 의료 보험 정보를 확인하  
십시오.

ਆਪਣੀ ਭਾਸ਼ਾ ਵਿੱਚ ਹੈਲਥਕੇਅਰ ਕਵਰੇਜ ਬਾਰੇ  
ਜਾਣਕਾਰੀ ਪ੍ਰਾਪਤ ਕਰੋ।

Получите информацию о медицинском  
страховом покрытии на вашем языке.

Ku hel macluumaadka ceymiska daryeelka  
caafimaadka luqaddaada.

Obtenga información sobre la cobertura  
de atención médica en su idioma.

Отримайте інформацію про покриття  
медичної страховки своєю мовою.

Nhận thông tin về bảo hiểm chăm sóc  
sức khỏe bằng ngôn ngữ của bạn.

[myseiu.be/hc](https://myseiu.be/hc)

Daryeel-bixiyeyaashu maalin kasta ayay u yimaadaan inay daryeelaan dadka kale, adiguna sidoo kale waxaad mudan tahay daryeel iyo taageero.

Yoolkeena waa inaan kuu fududeyno inaad hesho daryeel caafimaad oo tayo sare leh oo kharash ahaan la awoodi karo, si aad diiradda u saarto caafimaadkaaga, qoyskaaga, iyo shaqada muhiimka ah ee aad qabato.

Hagahan wuxuu ku siinayaa faham ku saabsan xulashooyinka caymiskaaga iyo tallaabooyinka aad qaadi karto si aad u codsato. Waxaan ku faraxsanahay inaan ku taageerno adiga iyo daryeelka muhiimka ah ee aad bixiso.

Ka dib markaad dib u eegto caymiskaaga caafimaad, qaado waqti aad ku sahmisoo dheefaha kale ee daryeel-bixiyeyaasha. Laga bilaabo fursadaha tababarka iyo dheefaha hawlgabka ilaa kabo bilaash ah oo aan simbiririxshon lahayn iyo sheqo ku beegga iyadoo loo maraayo Carina, dheefahan waxaa loogu talagalay inay ku taageeraan. Booqo [myseiu.be/bg](http://myseiu.be/bg) si aad wax badan u ogaato.



Merissa Clyde,  
Maamulaha Guud  
SEIU 775 Benefits Group

# Tilmaamo Tallaabo-ka-Tallaabo ah oo ku aadan Codsashada Caymiska

## 1) Wax badan ka ogoow caymiskaaga

- **Sahmi xulashooyinka caymiskaaga oo dib u eeg Faahfaahinta Qorshahaaga** si aad u fahanto kharashaadka aad adigu jeebka ka bixineyso kahor magdhawga caymiska ee la xiriira daawo qoritaanka, daaweynta iyo adeegyada caadiga ah.
- **Dib uga eeg faahfaahinta u qalmitaanka** bogga 5 si aad u aragto haddii aad u qalanto.
- **Dooro ikhtiyaarka caymiska iyo qorshaha ilkaha.**

## 2) Isu diyaari inaad codsato

- **Soo ururi macluumaadkaaga.** Waxaad u baahan tahay lambarkaaga Soshal Sekuritiga iyo magaca shaqo-bixiyaha si aad u codsato.
- **Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha): Soo ururi dukumentiyada Xaqiijinta Ku Tiirsanaanta.** Wax badan baro oona ka hel tilmaamo barta [myseiu.be/cfk](http://myseiu.be/cfk).

## 3) Samayso koontada dheefaha caafimaadka

- **Baro sida looga sameysto koonto barta [myseiu.be/hba](http://myseiu.be/hba).** Acoonkaaga waxaa maareeya MagnaCare, maamulahaaga dheefaha caafimaadka. Koontooyinka hadda waxaa lagu heli karaa Af-Ingiriisi. Haddii aad u baahan tahay caawin ama taageerada luuqadda wac 1-877-606-6705.

## 4) Gudbi codsigaaga

- **Ka buuxi codsi ka hor waqtiga kama dambaysta ah** barta [myseiu.be/magnacare](http://myseiu.be/magnacare) ama iimayl ahaan. Wax badan ka baro bogga 5.
- **Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha): Soo gudbi dukumiintiyada Xaqiijinta ku Tiirsanaanta** marka aad codsaneyso. Ka baro sidaad u soo gudbin lahayd dukumiintiyadaada barta [myseiu.be/cfk](http://myseiu.be/cfk).

Waxaad ku heli doonta rasiidka codsiga iimayl ahaan 1 maalin gudaheed iyo go'aanka caymiska iimayl ahaan 30 maalmood gudahood. Haddii kale, wac 1-877-606-6705.



*Ka dib ilmaheedii labaad, Dani waxay labadeedii canug ka qorte Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha), iyadoo amaanaysa "heerka wayn" ee ka caawiya qoyskeeda inay lacag keysadaan bil kasta.*

**Dani R.**  
Daryeel bixiye, Asotin

# Xulashooyinka Daryeelka Caafimaad

Hel caymis daryeel caafimaad oo tayo sare leh oo ka billaabma kaliya \$25 bishii. Waxaad dooran kartaa inaad naftaada uun daboosho ama ku darto Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha) ee caruurta kugu tiirsan.

## Fursada 1



**Ceymiska Shakhsi Ahaaneed Caafimaadka iyo Ilkaha**

**\$25/bishii.**

**Kharashka Wada Bixinta Billaha**

Ku hel caymiska caafimaadka iyo ilkaha naftaada kaliya \$25 bishii.

**Kharashka Wada Bixinta Billaha ah:** qaddarka aad bixiso bil kasta ee loogu talagalay ceymiska caafimaadkaaga ah. Ka eeg bogga 6-aad wixii faahfaahin ah.

**Xaq u yeelashada**

Shaqee 80 saacadood ama ka badan bishii.

## Fursada 2



**Ceymiska Shakhsi Ahaaneed + Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha): Caafimaadka iyo Ilkaha**

**\$125/bishii.**

**Kharashka Wada Bixinta Billaha**

Ku hel caymiska caafimaadka iyo ilkaha naftaada, oo lagu daray carruurtaada, kaliya \$125 bishii.

### **Waa qarash isku mid ah, xitaa haddii aad carruur badan ku darto!**

Waxaad ku dari kartaa carruurta xaq u leh ee kugu tiirsan illaa dhalashadooda 26-aad, oo ay ku jiraan carruurta si dhabta ah loo dhalay, kuwa la korsaday, carruurta lammaanahaaga iyo carruurta uu dhalay lammaanaha aad wada nooshihiin.

**Xaq u yeelashada**

Shaqee 120 saacadood ama ka badan bishii.

## Fursada 3



**Ceymiska Shakhsi Ahaaneed + Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha): Ilkaha-Kaliya**

**\$35/bishii.**

**Kharashka Wada Bixinta Billaha**

Ku hel caymiska caafimaadka iyo ilkaha naftaada, oo lagu daro caymiska ilkaha ee carruurtaada, oo keliya \$35 bishii.

# Dheefaha Caymiska

## Booqashooyinka Daryeelka Aasaasiga ee Bilaashka ah

Ma jiro wax kharash ah oo lagaa qaadayo markaad booqato bixiyahaaga daryeelka aasaasiga ah si loo hubiyo caafimaadkaaga ama markaad xanuunsan tahay. Sidoo kale waxaa jira adeegyo daryeel oo lagu bixiyo si fogaan arag ah oo kuu oggolaanaya inaad daryeel ka hesho adigoo guriga jooga.

Tijaabooyinka ama adeegyada dheeraadka ah waxay yeelan karaan kharash.

## Daryeelka Xaalada Degdegga ah & Gurmadka Degdegga Ah

Qorshahaagu wuxuu daboolayaa daryeelka degdegga ah iyo booqashada qolka gurmadka degdegga ah. Daryeelka degdegga ah waa xulasho u habboon oo loogu talagalay arrimaha aan gurmadka deg degga ahayn marka dhakhtarkaaga aan la heli karin. Daryeelka xaaladda degdegga ah waxaa la siiyaa xaaladaha halista ah ama kuwa nololaha halista geliya.

## Daawo qorista

Waxaad marin u heli kartaa noocyo badan oo daawo qorista ah, oo ay ku jiraan ikhtiyaarro sahlan oo boosto ahaan laguugu soo diro gurigaaga.

## Caafimaadka Dhimirka

Caymiskaagu wuxuu daboolayaa taageero xirfadeed oo caafimaadka maskaxda ah, maaraynta daawooyinka, daaweyn kooxeed, daryeel kale oo beddel ah, iyo helitaanka qalabyada is-daryeelka iyo barnaamijyo.

## Tababarka Fayoqabka & Barnaamijyada

Hel taageero kuu gaar ah si aad u maareyso xaaladaha daba-dheeraada oo aadna u wanaajiso caafimaadkaaga guud. Qorshahaagu wuxuu ka kooban yahay tababar caafimaad, hagid koox daryeel iyo qalab kaa caawinaya inaad la socoto horusocodkaaga.

## Daliigista & Daawaynta Lafaha

Waxaa jira ikhtiyaarro qiimo jaban oo loogu talagalay daawaynta jirka, duugis, daryeelka lafaha iyo murqaha, daaweyn dhaqameedka la adeegsado irbaddaha iyo barnaamijyada caafimaad ee lagu bixiyo sida fogaan araga ah.

## Aragga

Caymiska aragga ee loo maraayo VSP waxaa ka mid ah baaritaannada indhaha oo joogto ah, gunno loogu talagalay in lagu soo gato ookiyaalo ama bikaacyada indhaha, iyo helitaanka shabakad ballaaran oo dhakhaatiirta indhaha ay ka tirsan yihiin.

## Maqalka

Idinko u maraaya EPIC Hearing, adiga iyo carruurtaadu waxaad heli kartaan baaritaanno maqalka ah iyo taageero qalabka maqalka ah iyada oo loo marayo bixiyeyaasha ku jira shabakadda.

## Daryeelka Guriga Qoyska, Taranka & Badhtamaha Nololaha

Markaad adeegsaneyso Progyny waxaad u heli kartaa dheefo marxalad kasta oo nololaha ah, laga bilaabo tarmida iyo qoys-dhisida ilaa uur qaadida, dhalmada ka dib iyo xilliga caado joogsiga. U hel caymis daaweynti ugu dambeeyse, taageero shakhsiyadeed iyo qof ahaan ama daryeelka fogaan aragga.

## Eeg faahfaahinta qorshahaaga si aad u aragto liiska buuxa ee dheefaha.

Waxay bixisaa faahfaahin buuxda oo ku saabsan qorshahaaga caafimaadka iyo ilkaha, oo ay ku jiraan kharashyada jeebka ka baxsan, iyo caymiska dawooyinka, booqashooyinka iyo daawaynta.

*Deborah waxay u baahnayd qaliin wadnaha furan ah oo ku kici lahaa boqolaal kun oo doolar haddii aan caymis loo helin. Iyadoo in yar ka walwalsan kharashaadka, ayay tiri "Waxaan awood u yeeshay inaan diiradda saaro naftayda iyo bogsashadayda".*

**Deborah M.**  
Daryeel bixiye, Vancouver





Melissa E.  
Daryeel bixiye, Seattle

# Noocyada Qorshaha Ceymiska Ilkaha

Daryeelka ilkaha waxay ka mid tahay daryeelkaaga caafimaadka. Isticmaal jaantuska si aad iskula barbar dhigto qorshayaasha oo aad u doorato qorshaha adiga kugu habboon.

	 DELTA DENTAL®	 Willamette Dental
<b>Dheefta Ugu Badan Sanadka</b>	\$5,000	Waxbo
<b>Lacagta la jaro</b>	\$0	\$0
<b>Baaritaanada Joogtada ah</b>	Waxaa Loo Dabaraa Si Dhameystiran	Waxaa Loo Dabaraa Si Dhameystiran
<b>Dheefaha Qurxinta Ilkaha</b>	Haa	Haa
<b>Bixiyeyaasha ah Shirkada Ceymiska</b>	Delta Dental waxa ay leedahay shabakad ceymis oo balaadhan oo bixiyayaal ah, oo ay ku jiraan goobaha miyiga ah. Waxaad u baahan doontaa inaad hesho Dhakhtarka Ilkaha ee Delta Dental PPO si aad faa'iidada ugu badan uga hesho dheeftaada.	Willamette Dental waxay goobo badan ku leedahay galbeedka Washington, taasoo kuu sahlaya inaad hesho dhakhtarka ilkaha ee Willamette hareeraha wadada I-5 corridor.
<b>Hel Dhakhtarka Ilkaha ee Kuu Dhaw</b>	<a href="https://deltadentalwa.com/fad/search">deltadentalwa.com/fad/search</a> Guji 'Delta Dental PPO' si aad u kala shaandaysid natiijooyinka kaaga soo baxaya raadinta.	<a href="https://locations.willamettedental.com">locations.willamettedental.com</a> Geli koodhka ZIP-ka goobta baaritaanka.
<b>Macluumaad Dheeraad ah</b>	1-800-554-1907 <a href="https://DeltaDentalWA.com">DeltaDentalWA.com</a>	1-855-433-6825 <a href="https://myseiu.be/willamette">myseiu.be/willamette</a>

# Su'aalaha Badanaa La'is Weydiiyo (FAQ) ee Caafimaadka Caymiska

## Sideen ugu qalmaa caymiska shaqsiyeed?

Waa inaad shaqeysaa **80 saacadood oo mushaar ah ama ka badan bishii** muddo 2 bilood ah si aad u noqoto mid u qalma caymiska shaqsi ahaaneed.

## Sidee ayaan u codsadaa?

**Ka codso barta internetka [myseiu.be/magnacare](https://myseiu.be/magnacare).** Haddii aad hesho Codsiga Manfacyada Caafimaadka, waxaad boostada ama fakis ahaan ugu diri kartaa codsiga oo dhammeystiran cinwaanka ama lambarka fakiska ee ku qoran codsiga. Khidmada boostada Mareykanka ayaa la iska rabaa.

Waxaad ku heli doonta rasiidka codsiga iimayl ahaan 1 maalin gudaheed iyo go'aanka caymiska warqad ahaan ama iimayl ahaan 30 maalmood gudahood. Haddii kale, wac 1-877-606-6705.

## Goorma ayaan codsan karaa?

Waxaa jira 3 jeer oo aad codsan karto caymiska:

- 1. U qalmitaankiHore:** 60 maalmood gudaheed laga billaabo taariikhda laga bilaabo qalabkaaga diiwaangelinta ee cusub ee u qalma. U-qalmitaanka hore waa marka ugu horreysa ee aad xaq u yeelato.
- 2. Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka):** Luulyo 1-20 sanad walba. **Haddii aad horey isu diiwaan gelisay caymiskaaga si toos ah ayaa loo cusbooneysiinayaa, wax tallaabo ah** looma baahna illaa aad rabto inaad isbeddel sameyso.
- 3. Dhacdada Nolasha ee u Qalanta (Qualifying Life Event, QLE):** 30 maalmood gudahooda ee QLE oo wax ka beddeleysa baahiyahaaga caymiska caafimaadka. Tusaalooyinka QLEs waxaa ka mid ah korsashada ilmo, luminta caymiska kale ee daryeelka caafimaadka ama imaanshaha furriin. Wixii warbixin dheeraad ah, booqo [myseiu.be/qle](https://myseiu.be/qle).

## Ma'u Qalantid Weli? Waxaad weli codsan kartaa inta lagu jiro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka).

Soo gudbi codsi\* si aad u bilowdo caymis shaqsiyeed marka aad shaqeyso 80+ saacadood bishii. Coverage for Kids (Caymiska Carruurta) wuxuu bilaabmaa marka aad shaqeyso 120+ saacadood bishii.

\* Haddii aadan hadda shaqeynin 80+ saacadood bishii, ma buuxin kartid codsi khadka tooska ah. Ka codso nuqulka foomka codsiga barta [SEIU775BG-caregiver@magnacare.com](mailto:SEIU775BG-caregiver@magnacare.com).

## Sideen ugu qalmi karaa caymiska Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)?

Waa inaad shaqeysaa **120 saacadood oo mushaar ah ama ka badan bishii** si aad u noqoto mid uqalma Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha).

## Yaan ku dari karaa Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)?

Waxaad ku dari kartaa carruurta xaq u leh ilaa iyo taariikhdooda dhalashada ee 26<sup>aad</sup>. Carruurta u qalma ee ku tiirsan waxaa ka mid ah carruurta aad dhashay, kuwa aad korsatay, carruurta adeerka ama eedada aad u tahay iyo carruurta uu dhalay lammaanahaaga.

Waxay ka diiwaan gashan yihiin qorshaha aad ku jirto, waxaana kaliya lagu diiwaangelin karaa si hoos imaata 1 daryeele. Caymiska wuxuu isku xiri karaa qorsheyaal dibadda ah. Wixii macluumaad dheeraad ah, wac 1-877-606-6705.

## Sideen ayaa ugu daraa Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)?

- 1. Buuxi qaybta Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)** ee onleen ahaan ama codsiga daabacan ahaan.
- 2. Dooro ikhtiyaarka caymiska** caafimaad iyo ilkaha ama ilkaha kaliya.
- 3. Ku soo gudbi dukumiintiyadaada Xaqiijinta Ku Tiirsanaanta** iyadoo codsigaaga ama 60 maalmood gudahood marka aad codsanayso\*\*. Dokumentiyada ay aqbali karto waxaa tusaale ahaan noqon doona caddaynta dhalashada ee ay dowladdu bixisay iyo ogaysiinta canshuuraha oo ay ku qoran tahay kuwa aad dooneyso in lagu daro kuwa dowladda ka faa'ideysatay.

\*\* Xaqiijinta Ku Tiirsanaanta ayaa loo baahan yahay marka la diiwaangelinayo carruurta markii ugu horreysay. Uma baahnid inaad dib u laba-jibaarto dukumentiyada hore loo xaqiijiyey, in la codsado mooyee.

## Booqo [myseiu.be/cfk](https://myseiu.be/cfk) si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah:

- Sida loo dalbado Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha).
- Cidda aad ku dari karto caymiska.
- Soo gudbinta dukumiintiyada cadeynta.



Sandra C.

Daryeel bixiye, Kennewick



## Goorma ayaa caymisku billaaban doonaa?

**Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka):** Soo gudbi codsiyada ama isbeddellada ugu dambeyn 20-ka Luulyo si aad u hesho caymiska laga billaabo 1-da Agoosto.

**U-qalmiitaanka Hore iyo Dhacdooyinka Noloshaha ee U qalma:** Daboolidu waxay billaabantaa 1-da bisha ka dib marka codsigaaga la helo oo la farsameeyo, taas oo qaadanaysa qiyaastii 2 toddobaad. Tusaale ahaan, haddii codsigaagii la dhameystiray la helo:

- Ugu dambeyn Maarso 15, daboolidu waxay billaabantaa 1-da Abriil.
- inta u dhaxaysa Maarso 16 - 31, caymisku waxay billaaban doontaa 1-da Maajo.

**Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)** ma billaaban karto illaa ka dib marka la helo xaqijinta ku tiirsanaantaada oo laga shaqeeyo.

## Sideen u bixiyaa kharashkayga wada bixinta bil kasta?

Shaqo-bixiyuhu si toos ah ayuu mushaarkaaga uga jari doonaa lacagta wada bixinta ah ee bil kasta aad bixiso (lacagta aad bixiso bil kasta) mushaarkaaga. Haddii loo-shaqeeyahaagu uusan awoodin inuu lacagta jaro, waxaad boostada laguugu soo diri doonta warqad aad iskaga bixiso iyo iimayl kugu hagaya inaad bixiso qaybtaada lacag-wadaaga khidmada ceymiska billaha ah. Waxaad ku bixin kartaa jeeg, ama adigoo isticmaalaya koontadaada faa'idooyinka caafimaadka ee internetka.

**Daryeel-bixiyayaasha CDWA:** Lacag-bixintaada ugu koowaad adiga ayaa iska bixin doonaa.

## Sidee saacadaha shaqadu saameyn ugu yeeshaan caymiskayga?

Marka lagu diiwaan geliyo caymiska, saacadaha aad bil gudahood ku shaqaynayso waxay go'aaminayaan xaaladdaada caymiska 2 bilood ka dib. Tusaale: Saacadaha Janaayo ayaa go'aamiya caymiska Maarso.

## Maxaa dhacaya haddii aan doonayo inaan joojiyo caymiska?

Si aad uga joojiyo caymiska naftaada ama carruurtaada, soo gudbi foomka Ka-dhaafida Caymiska. Haddii la helo ugu dambeyn 15-ka caymisku waxa uu dhamaanayaa 1-da bisha xigta. Haddii la helo kadib 15-ka caymisku waxa uu dhamaanayaa 1-da bisha soo socota.

**Muhiim ah:** Dib ayaad iska diiwaangelin kartaa oo kaliya inta lagu jiro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka) ama Dhacdada Noloshaha ee U qalanta. Ka dhaafitaanada la helo ka hor Luulyo 1 dib ayaa loo cusboonaysiinayaa inta lagu jiro Open Enrollment (Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah ee Ceymiska Caafimaadka). Waa inaad soo gudbisaa foom cusub oo Ka-dhaafitaanka Caymiska ah si aad u sii heysato ka-dhaafitaankaada. Haddii aad heysate caymis 12-kii bilood ee la soo dhaafay, si otomaatig ah ayaa lagu diiwaangelinayaa inaad soo gudbiso foom cusub oo ka-dhaafitaan ah mooyee.

## Ka waran haddii aanan shaqeynin saacado igu filan?

Bilaha Dib u dhigista waxay bixiyaan ilaa 2 kordhin hal bil oo caymiska caafimaadka sanad kasta, taasoo ka caawinaysa adiga iyo dadka kugu tiirsan inaad sii haysataan caymiska haddii aadan buuxin saacadaha shaqo ee loo baahnaa. Wax badan ka baro [myseiu.be/gm](http://myseiu.be/gm).

Haddii aad lumiso caymiska, waxaa lagu soo gudbin doonaa macluumaad COBRA haddii aad rabto inaad sii wadato caymiska adigoo bixinaya lacag bille ah. Haddii aad joojiyo daryeel-bixinta, ka eeg u-qalmiitaankaaga Washington Apple Health ama booqo [wahealthplanfinder.org](http://wahealthplanfinder.org).

## Hel saacado dheeraad ah si aad u heysato caymiskaaga.

Haddii aad u baahan tahay saacado dheeraad ah si aad u hesho ama u sii heysato daboolidda, isku day Carina, dheef shaqo-beegid bilaash ah oo kaa caawinaya inaad hesho macaamiil badan.



Bisha Shaqada	Bisha Caymiska
JANAAYO →	MAARSO
FEBRAAYO →	ABRIIL
MAARSO →	MA SAMAYN
ABRIIL →	JUUN
MA SAMAYN →	LUULYO
JUUN →	AGOSTO
LUULYO →	SEBTEMBAR
AGOSTO →	OKTOOBAR
SEBTEMBAR →	NOOFEMBAR
OKTOOBAR →	DISEMBAR
NOOFEMBAR →	JANAAYO
DISEMBAR →	FEBRAAYO

Saacadaha aad bishan mushaarka ku shaqayso:

Go'aami caymiska bishan:

Patrick M. Bixiyaha daryeelka, Puyallup

# U hel Taageero

wixii ah su'aalaha aad ka qabto caymiska daryeelka caafimaadka, u-qalmitaanka, codsashada iyo wax kaloo badan.

Adeegga macaamiisha wuxuu diyaar yahay Isniin-Jimce, 8 subaxnimo illaa 6 fiidnimo.

**1-877-606-6705**

Taageero luuqad ahaan ah waa la heli karaa.

**Taageerada Sheekeysiga Tooska ah**

Gal [myseiu.be/magnacare](https://myseiu.be/magnacare) si aad u hesho taageerada sheekeysiga.

**[SEIU775BG-caregiver@magnacare.com](mailto:SEIU775BG-caregiver@magnacare.com)**

Ma awoodi weyday inaad la xiriirto adeegga macaamiisha inta lagu jiro saacadaha shaqada? Iimayl dir oo hel jawaab 2 maalmood oo shaqo gudahood.



## Faham Erayada Guud ee Ceymiska

Eeg qeexitaannada erayada guud si aad si wanaagsan ugu fahamto caymiskaaga.

[myseiu.be/hc-terms](https://myseiu.be/hc-terms)

## Wax badan Ka Ogoow Coverage for Kids (Caymiska Ilmaha)

Baro sida loo codsado oona buuxi codsigaaga.

[myseiu.be/cfk](https://myseiu.be/cfk)

## Marin u hel Akoonkaaga Dheefaha Caafimaadka

Baro sida loo sameysto akoon oona ka codso caymiska onlaynka.

[myseiu.be/hba](https://myseiu.be/hba)



## Caregiver Kicks: Kabo Bilaash ah oo Loogu Talagalay Daryeel Bixiyeyaasha

Waxaa lagu heli karaa in ka badan 90 qaab oo ka socda Reebok illaa Sketchers, Caregiver Kicks waa kabo aan simbiririxasho lahayn oo loogu talagalay inay kuugu ilaaliyaan si ammaan ah oo raaxo leh aad dareento inta aad shaqada ku jirto. Daryeel bixiyeyaasha u qalma waxeey heli karaan joog sannad kasta!

[myseiu.be/kicks](https://myseiu.be/kicks)

2026-2027

CAYMISKA DARYEELKA CAAFIMAAD

# Faahfaahinta Qorshaha



**Buuggan waxa uu ka kooban yahay dukumiintiyo muhiim ah oo kaa caawin doona fahamkaada caymiskaaga daryeelka caafimaadka:**

**Soo Koobitaanka Isbeddelada Qorshaha (SMM):**

Wuxuu sheegaa wax kasta oo cusboonaysiin ah ama wax ka beddelo ah oo ku imaada qorshahaaga laga bilaabo Agoosto 1, 2026.

**Sawirka Guud ee Caafimaadka iyo Qorshaha Caymiska Ilkaha:**

Dulmar degdeg ah, oo fudud in la akhriyo oo ku saabsan dheefahaaga ee loogu talagalay qorshahaaga caymiska caafimaad iyo noocyada caymiska ilkaha, oo ay diyaarisay SEIU 775 Benefits Group.

**Soo Koobitaanka Dheefaha iyo Ceymiska (SBC):**

Waa sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan qorshahaaga caymiska, oo ay ka mid yihiin:

- Sida guud ee loo daboolo baahiyaha caafimaad iyo daawooyinka (sida booqashada dhakhtarka, shaybaarada, daryeelka sokorow, iwm).
- Waxa aad bixinayso iyo waxa qorshuhu uu bixinayo (khidmadaha kaa go'aayo, lacagaha hore-loo bixiyo, iyo lacag caymiska lawada bixiyo).
- Waxa qorshuhu daboolayo—iyo waxa aanu daboolin (xadidaadaha ama wax laga reebay caymiska).

**Khayraadka Qorshaha:**

Lambarrada taleefanka iyo mareegaha aad isticmaali karto marka lagu diiwaangeiliyo.

Waxaad xaq u leedahay qorshaha caymiska caafimaad ee Kaiser Permanente of Washington HMO. Qorshahan waxa uu dhaqangalayaa laga bilaabo Agoosto 1, 2026 ilaa Luulyo 31, 2027.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan SBC, ama su'aalo kale oo ku saabsan caymiska, fadlan kala xidhiidh Adeegga Macaamiisha Dheefaha Caafimaadka:

**1-877-606-6705**

Isniin-Jimco, 8 a.m. ilaa 6 p.m.

**[SEIU775BG-caregiver@magnacare.com](mailto:SEIU775BG-caregiver@magnacare.com)**



# Soo Koobitaanka Wax-ka-beddelka Sheyada iyo Yaraynada

**ku socoto Caymiska Caafimaadka ee lagu bixiyo SEIU  
Healthcare NW Health Benefits Trust ee loogu talagalay  
Adeeg Bixiyeyaasha Shaqsiyadeed (IPs) ee Consumer Direct of  
Washington (CDWA) iyo Adeeg Bixiyeyaasha Hay'ada (AP-yada)**

**Soo Koobitaanka Isbeddelada Qorshaha ("SMM") wuxuu wax ka beddelayaa qaar ka mid ah macluumaadka ku jira Soo Koobitaanka Sharaxaada Qorshaha ("SPD") ee loogu talagalay kharash dabarida caymiska ee Qorshaha Asaasiga ah ("Qorshaha") kaas oo qeexaaya Qorshaha laga bilaabo Agoosto 1, 2026.**

Waxay dhaqan gelyasaa laga bilaabo Agoosto 1, 2026, dheefaha qorshaha iyo xeerarka u-qalmiinta ee caymiska daryeelka caafimaadka ayaa is beddeli doona. APs and IPs waa inay ka warqabaan horumarinada dheefaha soo socda:

- Daryeelka Araga VSP waxay noqon doontaa bixiyahaaga cusub ee aragga ee joogtada ah, oo bixiya baaritaannada indhaha, qalabka indhaha, iyo muraayadaha indhaha ee la xidho.
- Xadka doolarka ee qalabka maqalka ee EPIC waa laga qaaday.
- Waxaad awoodi doontaa inaad hesho ilaa 12-bilood oo daaweynta hormoonka ama daawooyinka ka-hortagga uurka hal mar la qaadanayo.

**Soo Koobitaanka Yareynada Sheyyada ("SMR") wuxuu wax ka beddelayaa qaar ka mid ah macluumaadka ku jira Soo Koobitaanka Sharaxaada Qorshaha ("SPD") ee loogu talagalay kharash dabarida caymiska ee Qorshaha Asaasiga ah ("Qorshaha") kaas oo qeexaaya Qorshaha laga bilaabo Agoosto 1, 2026.**

Waxay dhaqan gelyasaa laga bilaabo Agoosto 1, 2026, dheefaha qorshaha iyo xeerarka u-qalmiinta ee caymiska daryeelka caafimaadka ayaa is beddeli doona. APs and IPs waa inay ka warqabaan waxyaabahaan soo socda:

- SEIU Healthcare NW Health Benefits Trust hadda dib dambe kuma bixinayso adeegyada iyada oo loo marayo Headspace.

Wixii faahfaahin dheeri ah ee ku saabsan isbeddeladan, fadlan kala xiriir Adeegga Macaamiisha lambarka 1-877-606-6705 (Isniin Jimce, 8 a.m ilaa 6 p.m.) ama iimail u dir SEIU775BG-caregiver@magnacare.com.

Kani waa soo koobid kooban oo ku saabsan dheefooyinka ay bixisay SEIU 775 Benefits Group. KANI MA AHAN HESHIIS AMA SHAHAADO CEYMIS. Dhammaan dheefooyinka, oo ay ka mid yihiin daryeelka baddelka ah, waxaa loogu talaglay adeegyo caafimaad ahaan muhiim ah. Qofka Xubnaha ah waxaa laga qaadi doonaa qiima wadaaga qaybta yar ee adeega ceymiska leh ama qiimaha saxda ah ee adeegaas. Si aad u hesho qodobadda ceymiska oo dhameystiran, oo ay ku jiraan xadidaadaha, fadlan ka tixraac shahaadadaada ceymiska.

Dheefaha	Shabakada Ceymiska Dhexdeeda
Lacag jarista ceymiska	Ma jirto lacagta jarista sanadlaha ah
Lacag jarista shaqsi ahaaneed ee la wareejinayo	Ma khuseyso
Haraaga lacag jarista kadib ee ceymiska	Haraaga lacag jarista kadib ee ceymiska ma jiro
Xadka lacagta jeebka laga bixiyo	<b>Xadka lacagta jeebka laga bixiyo ee shaqsiyan:</b> \$1,200 <b>Xadka lacagta jaabka laga bixiyo ee qoyska:</b> \$2,400 Kharashyada jaabka laga bixiyo ee adeegyadan ceymiska leh ee soo socda waxay ka mid yihiin xadka lacagta jaabka laga bixiyo: Dhammaan kharash qeybsiga ee adeegyada ceymiska leh
Muddada sugitaanka xaalad horay u sii jirtay (PEC)	PEC ma jiro
Qiimaha ugu badan inta aad nooshahay	Aan xadidinayn
Adeegyada bukaan socodka (Booqashooyinka xafiiska)	Ma jirto khidmadaha adeega ceymiska assaasiga ah/\$15 khidmadaha adeega ceymiska takhasuslaha
Daryeelka Degdegga ah	Xarunta Daryeelka Degdegga ah ee Shabakada: Ma jirto khidmadaha adeega ceymiska assaasiga ah/\$15 khidmadaha adeega ceymiska takhasuslaha
Adeegyada isbitaalka	<b>Adeegyada bukaan jifka:</b> \$100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba. Oggolaanshaha hore ayaa loo baahan yahay ama ceymis ma lahaan doono. <b>Qalliinka bukaan socodka:</b> \$50 khidmada adeegga ceymiska
Daawooyinka dhakhtarku qoro (daawooyinka qaarkood ee la isku duro waxaa lagu dabari karaa adeegyada Bukaan Socodka)	<ul style="list-style-type: none"> <li>Daawooyinka lagu qiimeeyo waxtarkooda/daawooyinka baddelka u ah kuwa kale ee la doorbidayo (Tier 1)/daawooyinka shirkadaha gaarka ah ee la doorbidayo (Tier 2) \$4/\$8/\$25 khidmada adeegga ceymiska daawooyinka 30ka maalmood la qaato</li> <li>Insuliin: Daawooyinka baddelka u ah kuwa kale ee la doorbidayo (Tier 1)/Daawooyinka shirkadaha gaarka ah ee la doorbidayo (Tier 2) \$0/\$0 Khidmada Adeegga Ceymiska</li> <li>Booriyaasha neefsiga iyo cirbadda EPI Daawooyinka baddelka u ah kuwa kale ee la doorbidayo (Tier 1)/Daawooyinka shirkadaha gaarka ah ee la doorbidayo (Tier 2) \$8/\$25 Khidmada Adeegga Ceymiska</li> </ul>
Ku iibsashada boostada ee daawada dhakhtarka uu qoro	\$5 oo lacag dhimis ah daawoada la qaato 30 bari
Daawaynta Toobinta	La dabaro ilaa iyo 20 booqasho halki caafimaad baarista halki muddo sanadeedba iyada oo aysan jirin oggeysiis horudhac ah; booqashooyin dheeraad ah marka uu ansixiyo qorshaha - oo si buuxda loo dabaro.
Adeegyada ambalaaska	Ceymiska wuxuu bixinayaa 80%, waxaad bixinaysaa 20%
Ku tiirsanaanta kiimiko	<b>Bukaan jifka:</b> \$100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba, oggolaanshaha hore ayaa loo baahan yahay ama ceymis ma lahaan doono. <b>Bukaan socodka:</b> \$0 khidmada adeegga ceymiska
Aalad, qalab iyo saad	Waxaa la dabbaray 100%. Oggolaanshaha hore ayaa loo baahan yahay ama ceymis ma lahaan doono. <ul style="list-style-type: none"> <li>Qalabka Caafimaadka ee Raaga</li> <li>Qalabka lafaha iyo murqaha lagu kabo</li> <li>Naasa-reebka qalliinka naasaha ka gadaal oo ku xadidan labo (2) lix bilood (6) oo kasta</li> <li>Saadka caloosha lagu dolooliyo</li> <li>Qalabyada isbeerka jirka</li> </ul>
Saadka sonkorowga	Insuliin, cirbado, sirinjero iyo mindi dalooliso ah-eeg daawooyinka Dhakhtarka uu qoro. Bamka insulin laga qaato ee bannaanka yaalo, mashiinta cabirta tamar dhaliyaha dhiiga, alaabaha iyo saadka wax lagu baaro—eeg Aaladaha, qalabka iyo saadka. Marka Aaladaha, qalabka iyo saadka ama Daawada dhakhtarku qoro ay ceymis leeyihiin oo ay xadidaada dheefta leeyihiin, saadka sonkorowga xadidaadahan ma qaban karaan.

Dheefaha	Shabakada Ceymiska Dhexdeeda
<b>Adeegyada sheybaarka cudur ogaanshaha iyo raajada</b>	<b>Bukaan jifka:</b> Lagu dabaro oo hoos imaada Adeegyada isbitaalka <b>Bukaan socodka:</b> Loo dabaro si dhameystiran, MRI/PET/CT \$50 khidmadaha adeega ceymiska Adeegyada raajada ee ugu qaalisan sida CT, MR and PET waa in la go'aamiyo inay u Habboonyihiin Caafimaad ahaan waxayna u baahan yihiin oggeysiis horudhac ah marka laga reebo inay la xiriiraan Daryeelka Gurmadka Degdegga ah ama adeegyada bukaan jifka.
<b>Xaaladaha deg-degga ah</b> (khidmada adeegga ceymiska waa la iska dhaafayaa haddii la seexiyo)	\$200 khidmada adeegga ceymiska ee xarun cayiman \$200 khidmada adeegga ceymiska ee xarun aan cayimnayn
<b>Baaritaanada maqalka</b> (joogtada ah)	\$0 khidmada adeegga ceymiska
<b>Qalabka maqal-kaaliyaha</b>	Lagu dabaro dheef gaar ah: Ceymiska maqalka EPIC. Ma lahan khidmada adeega ceymiska, mal ahan xaddid hashi dhagba 3 sano oo kasta oo laga bixinayo kharashka maqal-kaaliyaha. Wax badan ka baro barta myseiu.be/epic.
<b>Adeegyada Caafimaadka Guriga</b>	Waxaa loo dabaraa si dhameystiran. Ma lahan xad booqashada. Oggolaanshaha hore ayaa loo baahan yahay ama ceymis ma lahaan doono.
<b>Adeegyada daryeelka dadka geerida ku dhaw</b>	Waxaa loo dabaraa si dhameystiran. Oggolaanshaha hore ayaa loo baahan yahay ama ceymis ma lahaan doono.
<b>Adeegyada dhalmo la'aanta</b>	Lagu dabaro dheef gaar ah: Taranka iyo Qoys Dhisida ee Progyny. Dheefta 2+1 Smart Cycles si looga caawiyo xubnaha safarkooda Taranka iyo Qoys Dhisida. Wax badan ka baro myseiu.be/progyny
<b>Daawaynta daliiga loo adeegsado</b>	Ceymis leh ilaa iyo 20 booqasho halki mudda sanadeedba iyada oo uusan jirin oggeysiis horudhac ah - \$0 khidmada adeegga ceymiska.
<b>Adeegyada duugista</b>	Eeg Adeegyada dhaqancelinta
<b>Adeegyada Dhalmada</b>	<b>Bukaan jifka:</b> \$100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba <b>Bukaan socodka:</b> \$0 khidmada adeegga ceymiska. Jadwalka daryeelka oo aan ku xirnayn khidmada adeegga ceymiska adeegyada bukaan socodka.
<b>Caafimaadka Dhimirka</b>	<b>Bukaan jifka:</b> \$100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba. Oggolaanshaha hore ayaa loo baahan yahay ama ceymis ma lahaan doono. <b>Bukaan socodka:</b> \$0 khidmada adeegga ceymiska
<b>Daawaynta dabiiciga ah</b>	Booqashooyin aan xadidnayn sanad walba oo aan lahayn oggolaansho horeeya. Waxaa loo dabaraa si dhameystiran.
<b>Adeegyada Ilmaha Markaa Dhashay</b>	Isbitaal joogista hore: Eeg Adeegyada Isbitaalka: Booqashooyinka xafiiska: Eeg Adeegyada Bukaan Socodka: Jadwalka Daryeelka fayow-qabaanta: Eeg Daryeelka kahortagga. Kharash wadaag walba oo ku aadan adeegyada ilmaha markaa dhashay waa ka gaar midka hooyada.
<b>Adeegyada Cayilka Saa'idka ah La Xiriiro</b>	Lagu dabaro kharash qeybsi marka shuruudaha caafimaadka la buuxiyo
<b>Xubin baddelida</b>	Aan xadidinayn, ma lahan muddo sugitaan <b>Bukaan jifka:</b> \$100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba <b>Bukaan socodka:</b> \$0 khidmada adeegga ceymiska
<b>Daryeelka kahortagga ah:</b> Hubinta fayow-qabka jireed, tallaalada, baaritaanka kansarka makaanka haweenka, raajada naasaha	Waxaa loo dabaraa si dhameystiran Adeegyada daryeelka kahortagga ah ee haweenka (oo ay ku jiraan dawooyinka kahortagga uurka iyo aaladaha iyo jeermis-dilida) dhammaamtood waxaa loo dabaraa si dhameystiran.
<b>Adeegyada dhaqancelinta:</b> Booqashooyinka baxnaaninta waa isku geyn booqashooyin daawayn halki mudda sanadeedba	<b>Bukaan jifka:</b> 60 maalmood halki mudda sanadeedba. Adeegyada cudur ogaanshaha caafimaadka dhimirka waxaa lagu dabaraa xadidaad la'aan. \$100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba. Oggolaanshaha hore ayaa loo baahan yahay ama ceymis ma lahaan doono. <b>Bukaan socodka:</b> 60 booqashooyin halki mudda sanadeedba. Adeegyada cudur ogaanshaha caafimaadka dhimirka waxaa lagu dabaraa xadidaad la'aan. Ma jirto khidmadaha adeega ceymiska assaasiga ah/\$15 khidmadaha adeega ceymiska takhasuslaha
<b>Xarunta dadka lagu xanaaneeyo</b>	Ceymis dhameystiran leh ilaa iyo 60 maalmood halki mudda sanadeedba.
<b>Jeermis Diillida</b> (qalliinka xininyaha, qalliinka xubinta taranka haweenka)	Waxaa loo dabaraa si dhameystiran.
<b>Adeegyada Kala Baxa Qanjaha (TMJ)</b>	<b>Bukaan jifka:</b> \$100 khidmada adeegga ceymiska, maalintiiba ilaa iyo 5 maalmood halki isbitaal dhigisba <b>Bukaan socodka:</b> \$0 khidmada adeegga ceymiska
<b>La-talinta barnaamijka joojinta tubaakada</b>	Barnaamijka Quit for Life - waxaa loo dabaraa si dhameystiran
<b>Jadwalka Daryeelka aragga iyo qalabka indhaha</b>	Lagu dabaro dheef gaar ah: Jadwalka daryeelka VSP. Wax badan ka baro barta myseiu.be/vsp

Tani waa guudmar kooban oo ku saabsan dheefaha la heli karo si la iskula barbardhigo oo kaliya oo kama dhigna heshiis. Marka lagaa diiwaangeliyo qorshe ceymis waxaad awood u yeelan doontaa inaad isticmaasho buug-yarahaaga dheefaha kaas oo faahfaahin dheeraad ah ka bixin doona Qorshahaaga Ceymiska Delta Dental PPO. Ka wac waaxda Adeegga Macaamiisha ee Delta Dental lambarka **1-800-554-1907** ama booqo **DeltaDentalWA.com** haddii aad qabto wax su'aalo ah.

**Muddada Dheefta:**

Janaayo 1 - Diseembar 31

**Qiimaha Ugu Badan ee  
Muddada Dheeft\***

 (halki qofba; ma khuseyso  
Class I): \$5,000

**Toosinta Ilkaha—**
**Dadka wawayn iyo Carruurta:**

 50% oo leh qiimaha ugu badan  
inta aad nooshahay  
oo ah \$5,000 qofkiiba

\*Daryeelka ilkaha ee laga helo dhakhtarka ilkaha ee PDA ayaa si buuxdo loo dabari doonaa ilaa iyo \$2,000 ugu badnaan, iyada oo lacagaha haraaga lacag jarista kadib laga dhaafay Class III - Adeegyada Wawayn.

**Delta Dental Network**

Dheefahaaga waxay ugu faa'iido badan yihiin marka aad adeegsanayso shabakadda Delta Dental PPO. Sidoo kale waxaad heli kartaa adeeggae Delta Dental Premier® network, kaas oo kaa caawinaya inaad ballaarisoo xulashooyinkaaga.

**Hel Burushka  
Ilkaha Sonicare  
oo Bilaash Ah**


Xubnaha Delta Dental ee booqda adeeg bixiyaha Pacific Dental Alliance (PDA) bukaan cusub ahaan, waxay heli karaan burushka ilkaha ee Sonicare oo bilaash ah.

Eeg liiska adeeg bixiyaha PDA oo dhamaystiran:

[myseiu.be/oe-pda](http://myseiu.be/oe-pda).

	Delta Dental PPO	Delta Dental Premier	Ka-Baxsan-Shabakadda
<b>Lacag Jarista Muddada Dheefta</b>			
Ma Khuseyso Class I & Toosinta Ilkaha Aan U Shaqeynin Shirkada (\$50 Halki Qofba)	\$0	\$50	\$50
<b>Class I - Cudur Ogaansho iyo Kahortag</b>			
Baaritaano Nadiifinta Foloraydh Raaajooyinka Bacda la saaro ilkaha	100%	80%	80%
<b>Class II - Ilka Soo Celinta</b>			
Soo celinta ilkaha Buuxinta Cadeynta ee Ilkaha Danbe Cilmiga Cudurada iyo Daaweynta Iliga Gudihisa (Xidid Dilidda) Cilmiga Cudurada Iliga Waxa Ku Wareegsan Qalliinka Afka	100%	60%	60%
<b>Class III - Adeegyada Wawayn</b>			
Ilkaha la gashto Ilkaha Qeybta Ahaan la gashto Bir Geliinada Iliga Lafaha Ilkaha Xiriiriya Lafaha Iliga Laga Dul Galiyo	80%	40%	40%

**Sifooyinka**

Kharashyada jeebka laga bixiyo ee ugu yar	○		
Wuxuu kuu dirayaa foomyaasha xaqsheegashada	○	○	
Maarayn tayo leh iyo ilaalinta kharashka	○	○	

**Xaalada Ilkaha ee Gargaarka Degdegga Ah:** Adeeg Bixiyayaasha Shirkada La Shaqeyna waxay bixin doonaan daawaynta Xaalada Ilkaha ee Gargaarka Degdegga Ah inta lagu jiro saacaha shaqada. Shirkada ayaa bixin doonta dheefaha Adeegyada La Dabaro ee ay ku bixiyaan Adeeg Bixiyayaasha Shirkada La Shaqeyna daawaynta Xaalada Ilkaha ee Gargaarka Degdegga Ah. Qofka Diiwaangashan ayaa raadsan kara daawaynta Xaalada Ilkaha ee Gargaarka Degdegga Ah ee laga helo Adeeg Bixiye Aan La Shaqaynin Shirkada haddii Qofka Diiwaangashan uu 50 mayl ka badan u jiro Xafiiska Adeeg Bixiyaha Shirkada La Shaqeyna.

Iyada oo ay damaanad qaadeyso Willamette Dental of Washington, Inc. Qorshahan ceymiska wuxuu bixiyaa ceymiska adeegyo oo balaaran. Liiska hoose wuxuu macluumaad kaa siinayaa qaar ka mid ah habraacyada ugu badan ee lagu dabaro qorshahaaga. Wac **1-855-433-6825** ama booqo **myseiu.be/oe-willamette** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Si aad u hesho liiska xadidaadaha iyo waxyaabaha reeban, booqo **myseiu.be/willamette-exclusions**.

Dheefaha	Khidmadaha adeega ceymiska
Qiimaha Ugu Badan Sanadka	Ma Lahan Qiimaha Ugu Badan Sanadka*
Lacagta la jaro	Ma lahan Lacagta la jaro
Booqashada Xafiiska ee Guud iyo Ilka Simmida	Ma Lahan Khidmadaha adeega Ceymiska booqashadiiba
<b>Adeegyada Cudur Ogaanshaha iyo Kahortagga</b>	
Jadwalka Baaritaanada iyo kuwa Gurmadka Dededegga ah, Raajooyinka, Ilka naadiifinta, Daaweynta Foloraydh, Bacda La Saaro Ilkaha (Halki iligba), Baaritaanka Kansarka ee Madaxa iyo Luqunta, Tilmaamta Nadaafadda Afka, Cabirka Ciirdka iyo Iliga u Dhaxeeya, Qiimeynta Caafimaadka Ciirdka iyo Ilkaha	Waxaa lagu Dabaraa Khidmadaha adeega ceymiska ee Booqashada Xafiiska
<b>Daawaynta Ilkaha ee Ilka Soo Celinta</b>	
Ilka buuxinta (Amalgam)	Waxaa lagu Dabaraa Khidmadaha adeega ceymiska ee Booqashada Xafiiska
Birta Dhoobka Leh ee La Geliyo Ilkaha	Waxaad bixineysaa \$250 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska
<b>Cilmiga Buuxinta Ilkaha Macmalka ah</b>	
Ilkaha Hoose ama Kore oo Dhameystiran	Waxaad bixineysaa \$400 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska
Lafaha Ilkaha Xiriiriya (halki Iligba)	Waxaad bixineysaa \$250 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska
<b>Cilmiga Cudurada iyo Daaweynta Iliga Gudhiisa &amp; Cilmiga Cudurada Iliga Waxa Ku Wareegsan</b>	
Daweynta Xidid Dilidda - Ilkaha hore	Waxaad bixineysaa \$85 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska
Daweynta Xidid Dilidda - Ilkaha dhexe	Waxaad bixineysaa \$105 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska
Daweynta Xidid Dilidda - Goosaha dambe	Waxaad bixineysaa \$130 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska
Qalliinka Lafta Ciridka (Ilkaha halki Geesba)	Waxaad bixineysaa \$150 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska
Ilka Sifeynta (Ilkaha halki Geesba)	Waxaad bixineysaa \$75 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska
<b>Qalliinka Afka</b>	
Jadwalka Ilig Bixinta (Hal Ilig)	Waxaa lagu Dabaraa Khidmadaha adeega ceymiska ee Booqashada Xafiiska
Qalliinka Ilig Bixinta	Waxaad bixineysaa \$100 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska
<b>Daaweynta Toosinta Ilkaha</b>	
Daaweynta Ka Hor Toosinta Ilkaha	Waxaad bixineysaa \$150 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska**
Daaweynta Toosinta Ilkaha ee Dhameystiran	Waxaad bixineysaa \$1,500 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska
<b>Bir Gelinta Iliga</b>	
Qalliinka Bir Gelinta Iliga	Dheefta bir gelinta iliga ee ugu badan oo ah \$1,500 halki Mudda sanadeedba
<b>Waxyaabo kala duwan</b>	
Kawaawiso	Waxaa lagu Dabaraa Khidmadaha adeega ceymiska ee Booqashada Xafiiska
Lacagaha Shaybaarka Ilkaha	Waxaa lagu Dabaraa Khidmadaha adeega ceymiska ee Booqashada Xafiiska
Nitrous Oxide	Waxaad bixineysaa \$40 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska
Booqashada Xafiiska Takhasuslaha	Waxaad bixineysaa \$30 oo ah Khidmada Adeegga Ceymiska halki Booqashaba
Madhawga Daryeelka Gurmadka Degdegga ah ee Goobta Ka Baxsan	Waxaad bixineysaa khidmado ka badan \$250

\*TMJ waxay leedahay \$1000 oo ah qiimaha ugu badan sanadka/ \$5000 oo ah qiimaha ugu badan inta aad nooshahay \*\*Khidmada adeegga ceymiska waxaa lagu shubayaa khidmada Daaweynta Toosinta Ilkaha ee Dhameystiran haddii macmiilka uu aqbal qorshaha ceymiska ee daaweynta. **Xaalada Ilkaha ee Gargaarka Degdegga Ah:** Adeeg Bixiyayaasha Shirkada La Shaqeeya waxay bixin doonaan daawaynta Xaalada Ilkaha ee Gargaarka Degdegga Ah inta lagu jiro saacaha shaqada. Shirkada ayaa bixin doonta dheefaha Adeegyada La Dabaro ee ay ku bixiyaan Adeeg Bixiyayaasha Shirkada La Shaqeeya daawaynta Xaalada Ilkaha ee Gargaarka Degdegga Ah. Qofka Diiwaangashan ayaa raadsan kara daawaynta Xaalada Ilkaha ee Gargaarka Degdegga Ah ee laga helo Adeeg Bixiye Aan La Shaqayn Shirkada haddii Qofka Diiwaangashan uu 50 mayl ka badan u jiro Xafiiska Adeeg Bixiyaha Shirkada La Shaqeeya.



**SEIU 775  
BENEFITS GROUP**

**vsp vision**

**Faahfaahinta Qorshaha**

**VSP Advantage**


**Taariikhda Dhaqangalka ah 8/1/2026**

Kani waa soo koobitaan kaliya. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan caymiskaaga aragga ee cusub, fadlan kala xiriir VSP Vision lambarka 800-785-0699.

### Adeeg Buuxa ee Qorshaha VSP Advantage

Lacagaha Wadabixinta (Baaritaano / Muraayado)	\$0 / \$0
<b>Inta jeer</b>	
Imtixaan	12 Bilood Walba
Muraayadaha Indhaha	12 Bilood Walba
Galka Muraayadda	12 Bilood Walba
<b>Faa'iidooyinka marka aad isticmaasho Bixiye ka tirsan Shabakadda VSP</b>	
Baaritaan Indho oo Dhameystiran	\$0 Khidmada Adeegga Ceymiska
Baaritaanka Muraayadaha Indhaha	\$0
Baadhista Isha Qeybta Dambe	\$0
Daryeelka Indhaha ee Caafimaad Muhiim ah	Waxaa Lagu Daboolay Qorshaha Caafimaadka Waxay ku xiran tahay Kharash Wadaagga ee Booqashooyinka Xafiiska ee Khuseeya
<b>Muraayadaha Indhaha</b>	
Hal Arag	Waa la daboolay
Laba Arag La isku Leemiyay	Waa la daboolay
Seddex Arag La isku Leemiyay	Waa la daboolay
<b>Gunnooyinka*</b>	
Gunnada Galka Muraayadda	\$250
Gunnada Nooca Galka Muraayadda ee La Xushay	\$270
Galka Muraayadda ee Costco	\$250
Weenaysooyinka Muraayada Indhaha ee La Dooran Karo Badal muraayadaha ama galalka muraayadda	\$600
